

Iska-diiwaangelinta dugsiga hoose sanadka 2027

Aasaaska (oo sidoo kale loo yaqaan Prep) waa sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose ee Victoria.

Ilmahaagu wuxuu bilaabi karaa dugsiga haddii uu gaaro 5 sanadood ka hor 30-ka bisha Abriil 2027.

Mar haddii uu ilmahaagu gaaro 6 sano waa khasab in dugsiga la geeyo.

Goorma ayaan diiwaangelinta sameyn karaa?

Codsiyada la isaga diiwaangelinayo dugsiga hoose ee dawlada Victoria sanadka 2027:

- Waxay furan yihiin laga bilaabo **Isniinta 20-ka bisha Abriil 2026**
- Waana in la soo gabagabeeyaa **Jimcaha 31-ka bisha Luulyo 2026**.

Waa maxay xuquuqda diiwaangelinta ee uu ilmahaagu leeyahay?

Victoria gudaheeda, ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay in uu dhigto dugsiga loo qoondeeyey ee xaafada ('dugsiga xaafaddaada') sida uu qabo *Sharciga Dib-u-habaynta Waxbarashada iyo Tababarka 2006 (Education and Training Reform Act 2006)*. Dugsiga deegaankaaga waxaa go'aaminaya dugsiga ku yaal aaga xaafada aad degan tahay. Si aad wax badan uga barato sida go'aannada diiwaangelinta loo sameeyo, booqo [Diiwaangelinta dugsiga](#).

Sidee uga diwaan galin karaa ilmahaaga sanadka ugu horeeya ee dugsiga hoose?

Waa tan sida ilmahaaga looga diiwaangelin karo sannad-dugsiyeedkooda ugu horreeya ee dugsiga hoose:

- 1. Hel dugsiga ku yaal xaafadaada**
Booqo www.findmyschool.vic.gov.au si aad u hesho dugsiga hoose ee dawladda ama dugsiyada kuu dhow.
- 2. La xiriir dugsiga**
La xiriir dugsiga hoose si aad u samaysato ballan lagugu tusayo dugsiga balse khasab maaha inaad ballantaas sameysato. Xaqiiji in dugsigu uu isticmaalo habka diiwaangelinta online ka ah (VicStudents) ama mid foom la soo buuxinayo. Macluumaadkan waxaa laga heli karaa bogga internetka ee dugsiga.
- 3. Soo dejiso xirmada macluumaadka**
Soo dejiso xirmada macluumaadka diiwaangelinta Aasaaska (U diyaargarowga) [ee Diiwaangelinta Aasaaska \(U diyaargarowga\)](#). Xirmada waxaa la heli karaa Khamiista 2-da bisha Abriil 2026.
- 4. U soo gudbi codsigaaga diiwaangelinta**
Ku soo gudbi codsiga diiwaangelinta **ugu dambeyn Jimcaha 31-ka bisha Luulyo 2026** qaab online ah (VicStudents) ama adoo isticmaalaya foom waraaqo ah iyadoo lagu saleynayo habka dugsiga ee lagu sharxay website kooda.
- 5. Hel natiijo**
Natiijada codsigaaga waxaa lagu soo sheegi doonaa **inta u dhaxaysa Isniinta 3-da bisha Agoosto iyo Jimcaha 14-ka bisha Agoosto 2026**. Haddii codsigaaga la ogolaado, waa inaad aqbashaa ugu dambeyn **Jimcaha 28-ka bisha Agoosto 2026**.
- 6. U diyaargarow xilliga kala guurka ee uu ilmahaagu galayo marka uu bilaabo dugsiga**
Ka qayb qaado kulamada loogu talagalay xilliga kala-guurka ardayda inta lagu jiro Teeramka 4-aad, 2026. Ilmahaagu wuxuu bilaabi doonaa Aasaaska (Foundation) laga bilaabo **Khmiista 28-ka bisha Janaayo 2027**.



Sideen ku heli karaa dugsiga ku yaal xaafadeyda?

Ka hel dugsiga dugsiga xaafadaada ku yaal bogga [Find my School](#) adoo raacaya tillaabooyinka hoose:

1. Gal www.findmyschool.vic.gov.au birawsarkaaga.
2. Geli address ka aad degan tahay meesha hoose ee ay ku qoran tahay 'Enter your address to get started'.
3. Ka dooro sanadka 2027 meesha ay ku qoran tahay 'Enrolment year'. **Aagaga dugsiyada ee sanadka 2027** waxaa la heli karaa **Khamiista 2-da bisha Abriil 2026**.
4. Ka dooro Primary meesha ay ku qoran tahay 'School type'.

Khariidadda ayaa markaas kabacdi ku tusi doonta addresskaaga, dugsiga ku yaal xaafadaada, dhanka bidixdana waxaa ku yaal siyaabaha aad kula xiriiri karto dugsiga. Haddii aad hoos u dhaadhacdo, waxay sidoo kale ku tusi doontaa shanta dugsiga ee ugu dhow addresskaaga. Waxaad sidoo kale ku raadin kartaa magaca dugsiga meesha ay ku qoran tahay 'Search for school'.

Ka waran haddii codsigayga diiwaangelinta aan la aqbalin?

Haddii codsigaaga la aqbali waayo, waxaad awoodaa:

- **Inaad ka dalbato** dugsiga kale. Ilmahaaga waxa loo dammaanad qaaday in uu boos ka heli doono dugsiga xaafadaada ku yaal. [Booqoli hel iskuulkayga \(Find my School\)](#) si aad ilmahaaga ugu heshid dugsiga xaafadaada.
- Rafcaan ka qaadata go'aanka. [Bogga Is-diiwaangelinta Aasaaska \(Prep\)](#) ayaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan habka rafcaan looga qaato natiijada codsiga diiwaangelinta.

Maxaa dhacaya haddii aan seego waqtiyada diiwaangelinta?

Waxaad codsan kartaa inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso Aasaaska (Foundation) sannad dugsiiyeedka 2027 xilli kasta laga bilaabo **Isniinta 20-ka bisha Abriil 2026**.

In kasta oo lagu farayo inaad soo gudbiso codsiga diiwaangelinta **inta aan la gaarin Jimcaha 31-ka Luulyo 2026**, hadana taas oo ay tahay waa la aqbali doonaa codsiyada kaas oo dib dhaca waqtigaas ee ay soo gudbiyaan qoysaska laga yaabo inay seegeen waqtigii diiwaangelinta, kuwa u guuray guri kale ama qoysaska dhawaan yimid Victoria.

Codsiyada diiwaangelinta ee la soo gudbiyo **wixii ka dambeeya 31-ka bisha Luulyo 2026** waxaa maamuli doona dugsiga hoose **marka la qabto**, iyadoo la raacayo Shuruucda Diiwaangelinta ee u degan Waaxda.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta dugsiga hoose?

Waxaad waydiisan kartaa dugsiga hoose ee xaafadaada ku yaal macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka diiwaangelinta Aasaaska.

Laga bilaabo **Isniinta 20-ka bisha Abriil 2026** waxaad sidoo kale ka heli kartaa xirmo macluumaad oo ku saabsan nidaamka diiwaangelinta ee Aasaaska (Foundation) bogga [Diiwaangelinta Aasaaska \(Prep\)](#).

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fasiraada xidhmada macluumaadka, fadlan kala hadal dugsiga hoose ee xaafadaada si aad u hesho caawimo.

Yaan kala xiriiri karaa wixii caawimaad ah?

Isu-duwaha Kala-guurka (The Transition Coordinator), Howlwadeenka Diiwaangelinta ama maamulaha dugsiga hoose ee aad rabto inaad codsato ayaa kaa caawin kara su'aalo kasta oo aad ka qabtid habka diiwaangelinta.

Xiriirada (links) muhiimka ah

Fadlan hoos ka hel xiriiro (links) muhiim ah oo adiga ku caawin kara marka ilmahaaga bilaabay dugsiga hoose:

Li hel Iskuulkayga (Find my School) – findmyschool.vic.gov.au

Macluumaadka aagagga dugsiga – vic.gov.au/school-zones

Isdiiwaangelinta Aasaaska (Prep) - vic.gov.au/enrolling-foundation-prep

Diiwaangelinta dugsiga – vic.gov.au/how-choose-school-and-enrol

Naafada iyo waxbarashada loo dhan yahay – vic.gov.au/disability-and-inclusive-education

Xiriirada xafiiska gobolka – vic.gov.au/office-locations-department-education

Jadwalka diiwaangelinta Aasaaska (Foundation) ee sanadka 2027

Taariikhaha 2026	Maxaa looga baahan yahay waalidiinta/daryeelayaasha inay sameeyaan?
Teeramka 1-aad	Talaadada 27-ka bisha Janaayo (ardaydu waxay bilaabayaana 28-ka bisha Janaayo) ilaa Khamiista 2-da bisha Abriil 2026
Teeramyada 1-aad iyo 2-aad, ee sanadka 2026	Ka qaybgal booqashooyinka dugsiga oo ay qabanqaabiyaan dugsiyada hoose (<i>balse khasab maaha adaa ikhtiyaar u leh ka qeybgalka</i>).
Marka la gaaro khamiista 2-da bisha Abriil 2026	Soonayaasha iskuulka ee sanad dugsiiyeedka 2027 ayaa la heli karaa. Waxaad ka heli kartaa dugsiga ku yaal deegaankaaga www.findmyschool.vic.gov.au.
Teeramka 2-aad	Isniin 20-ka bisha Abriil ilaa Jimcaha 26da bisha Juun 2026
Laga bilaabo Isniinta 20-ka Abriil 2026	- Laga bilaabo bilowga Teeramka 2aad, buuxi oo u soo gudbi codsiga ilmahaaga - ama ku soo dir online ama isticmaal Foomka Codsiga ee ku jira Xirmada Macluumaadka Diiwaangelinta, waxayna ku xiran tahay waxa uu dugsigaagu kugula taliyo. Wixii faahfaahin dheeraad ah, waxaad ka soo degsan kartaa Xirmada Macluumaadka Isdiiwaangelinta Aasaaska (Prep).
Teeramka 3-aad	Isniinta 13-ka bisha Luulyo ilaa Jimcaha 18-ka bisha Sebteembar 2026
Ugu dambeyn Jimcaha 31-ka bisha Luulyo 2026	U gudbi dugsiga codsigaaga oo dhamaystiran ugu dambeyn taariikhdaas.
Inta u dhaxaysa Isniinta 3-da bisha Ogosto iyo Jimcaha 14-ka bisha Ogosto 2026	Dugsiyada hoose waxay qoraal ahaan kuugu soo sheegi doonaan natiijada diiwaangelinta inta lagu jiro muddadan. - Haddii dalabkaagu aanu guulaysan, waxaad racfaan u gudbin kartaa dugsiga hoose.
Ugu dambeyn Jimcaha 28-ka bisha Ogosto 2026	Xaqiiji aqbalaadda booska ilmahaaga adigoo buuxinaya Foomka Diiwaangelinta ee la socda dalabka diiwaangelinta. - Haddii aad rabto inaad racfaan qaadata, racfaan qoraal ah u gudbi dugsigaaga hoose inta aan la gaarin Jimcaha 28-ka bisha Agoosto.
Ugu dambeyn Jimcaha 11-ka bisha Sebteembar 2026	Dugsiyada hoose waxay qoraal ahaan kuugu soo sheegi doonaan natiijada racfaanka.
Ugu dambeyn jimcaha 18-ka bisha Sebtembar 2026	Haddii aad ku guuldareysatay inaad racfaan u gudbisoo dugsigaaga hoose, waxaad racfaan qoraal ah u gudbin kartaa Agaasimaha Gobolka ee ay khuseeyso.
Teeramka 4-aad	Isniinta 5-ta bisha Oktoobar ilaa Jimcaha 18-ka bisha Diseembar 2026
Teeramka 4-aad, 2026	Ka qaybgal fadhiyada kala-guurka ee ay martigeliyaan dugsiyada hoose.
Ugu dambeyn Jimcaha 6-da bisha Nofeembar 2026	Haddii aad racfaan u gudbisay Agaasimaha Gobolka, gobolku wuxuu si qoraal ah kuugu soo sheegi doonaa natiijada ugu dambeyn marka la gaaro taariikhdan. Tani waxay khuseysaa oo keliya racfaannada la qabto ugu dambeyn taariikhda ay wax xirmayaan ee ah Jimcaha 18-ka bisha Sebtembar.